

# Cimilada iyo Bulshada



*'Hadafka ACH waa in qaxootiga iyo muhaajiriinta UK ku nool lagu dhiirigeliyo in ay helaan nolol ku slaysan hammi iyo isku-filaansho.'*

# Hordhac

---

Bulshada ay ACH la shaqayso badanaa kama qaybqaataan doodaha la xidhiidha isbedelka cimilada inkastoo tirada dadka qaxootiga ah ee isbedelkaasi uu saameeyay ay sannad kasta sii kordhayso. Ujeeddadayadu waa in bulshadeenu ay ka qaybqaataan doodda isbedelka cimilada, ay wax ka ogaadaan xaaladaha ku gadaaman isbedelka cimilada ee UK iyo caalamka, iyo in ay arkaan oo ay ogaadaan fursadaha shaqo ee ka jira hay'adaha iyo shirkadaha ku hawlan dhimista waxyeelada deegaanka (green sector).



## Mashruuca Wax-ka-qabashada cimilada

ACH, iyada oo la shaqaynaysa 5 hay'adood oo kale, waxay ka qaybqaadatay mashruuc loogu talagalay in kor loogu qaado kaalinta hoggaamineed ee bulshooyinka Bristol ay ku muujin karaan awoodda ay u leeyihiin in ay si dhab ah uga jawaabaan isbedelka cimilada.

Muddadii uu mashruucani socday waxaanu diyaarinay macluumaad ay bulshadu ka baran karaan isbedelka cimilada. Macluumaadkan waxa laga heli karaa degelka waxbarashada ee ACH (ACH's online learning platform), kaas oo xubnaha bulshada ka tirsan ee doonaya in ay wax ka bartaan isbedelka cimilada ay geli karaan iyaga oo aan wax lacag ah bixinin.

Sidoo kale, muddadii uu mashruucani socday waxa aanu xubno ka tirsan bulshada weydiinay aragtidooda ku saabsan isbedelka cimilada. Natiijadii ka soo baxday na waxa aanu u isticmaalnay in la soo bandhigo arrimaha mudnaashaha leh ee la xidhiidha isbedelka cimilada.

# Arrimaha mudnaanshaha la siinayo

In bulshadeena codkooda la maqlo waxay ahayd waxa ugu muhiimsan mashruucayaga. Sidaa daraareed, iyada oo la isticmaalayo natiijadii ka soo baxday weydiimihii bulshada, waxa aanu ogaanay 7 arrimood oo mudnaansho leh. Waxaana kamid ah:



# Arrimaha mudnaanshaha la siinayo

## Wax-ka-qabashada Gaadiidka:

- In la kordhiyo gaadiidka bulshada (public transport) iyo khadadka (routes) ay maraan, laakiin waa in ay noqdaan kuwo ay bulshadu qiimahooda awoodi karto
- Xaafadaha oo laga dhigi kuwo lagu noolaan karo
- In la yareeyo baaburta marta iskuulada hortooda

## Wax-ka-qabashada Guryaha/Dhismayaasha:

- Guryaha oo laga dhigo in ay mar walba diiranaadaan (insulation) si loo yareeyo lacagta biilasha
- Samaynta heerka ugu hooseeya ee looga baahanyhay guryaha la kiraysto
- In la badiyo guryaha muddada dheer la kiraysan karo si loo yareeyo guuritaanka badan

## Tamarta:

- Soo bandhigidda tamar biilashooda la awoodi karo
- Fursadaha shaqo ee ka jira hay'adaha iyo shirkadaha ku hawlan wax-kaqabashada iyo dhimista waxyeelada deegaanka oo si siman loo qaybiyo
- Helitaanka lacagaha loogu talagalay qalabka kaydinta tamarta

## **Cunto:**

- **In la kordhiyo helitaanka cuntada caafimaadka leh ee iibsashadeeda la awoodi karo**
- **Dadka aan guryahoodu beero lahayn waa in loo helo meelo ay cunto ku beeran karaan**
- **Iskuulada waa in lagu bartaa cuntada**

## **Isticmaalidda iyo Khasaarinta cuntada:**

- **In la helo agab la iibsan karo oo cuntada lagu soo shubo**
- **Cuntada makhaayadaha ka soo hadha oo la qaybiyo**
- **Meelaha qashinka lagu qubo oo si fiican loo maareeyo, gaar ahaan xaafadaha danyarta**

## **Deegaanka dabiiciga ah iyo makhluuqaadka ku nool:**

- **Xaafadaha danyarta ah waa in ay helaan beero lagu nasto (parks) oo tayadoodu fiicantahay**
- **Iskuulada waa lagu bartaa deegaanka dabiiciga ah iyo makhluuqaadka ku nool**
- **Hawlaha la xidhiidha wax-ka-qabashada iyo dhimista waxyeelada deegaanku waa in ay noqdaan kuwo ay cid kastaa awoodi karto**

## **Dhaqaalaha/Ganacsiga/Shaqooyinka/Waxbarashada:**

- **Shaqooyinka la xidhiidha wax-ka-qabashada iyo dhimista waxyeelada deegaanka oo si siman loo heli karo**
- **Waa in aa wakhti badan lagu lumin maalgelinta wacyigelinta hawlaha la xidhiidha wax-ka-qabashada iyo dhimista waxyeelada deegaanka ee ay dadku fahamsanyihiin**
- **In la garowsado in ganacsiga iyo ganacsatadu ay leeyihiin masuuliyadda ugu weyn ee isbdeedalka cimilada**



# Haldoorka ku Suntan Cimilada

---

Kaarboonka ka dhasha ficilada ay mas'uulka ka yihiin dadka ACH guryaha ka kiraysta wuxuu aad uga hooseeyaa karboonka ka yimaadda qof keliya oo ka tirsan bulshada Bristol ku nool. ACH waxay u aqoonsatahay in dadka guryahooda kiraystaa ay yihiin haldoorka ku suntan cimilada, waana muhiim in aannu hoosta ka xariiqno in arrintani aanay ahayn wax ay doorteen.

Dadka guryahayaga kiraystaa waxay kamid yihiin dadka aan ka qaybqaadanin qaabaynta doodaha imika socda, waana dadka ay arrintani aad u saamayso. Waa dadka ugu waxyeelada yar marka laga hadlayo isbedelka cimilada, haddana culayska ugu weyni iyaga ayuu soo gaadhaa.

ACH, waxaanu fahamsanahay waayaha qaxootiyada iyo waxa ay soo mareen. Waxaanu awood u leenahay in aanu u soo bandhigno hab ay kaga qaybqaadan karaan doodaha iyo wax-ka-qabshada isbedelka cimilada si ay iyagana uga caawiso in ay dadka wax la qabsadaan oo ay bulsho weynta kamid noqdaan.







*"Xafladaha Bristol"*

# ACH

